



## UJEEDO: XAALADDA PUNTLAND

21.04.2022

Xaaladda Dowladda Puntland iyo guud ahaan geyiga Soomaaliya ay marayso waa mid adag oo u baahan in loo istaago sidii wax looga qaban lahaa, waxaa bulshada isugu darsamey abaar, biyo la'aan, hoos-u-dhac dhaqaale, sicir-barar, doorashooyin daba-dheeraadey, khilaafaad iyo maamul xumo. Haddaba urur siyaasadedka SINCAD waxa uu walaac ka muujinayaa xaaladda adag ee dalku galay.

### **XAALADDA ABAARAHA:**

Inta badan deegaanada Puntland waxaa ka jirta abaar aad u ba'an, gobolada qaarkood dadku biyo la'aan ayey u dhimanayaan, Dowladda Puntland ayaan xil iska saarin sidii loogu gurman lahaa dadka abaartu saameysey ee gobolada Puntland, iska dhaaf in shacabka biyo loo dhaamiyee, waxaa kor loo qaadey sicirka qiimaha biyaha sida aan wada ognahay taas oo xaaladda uga sii dartey. Waxaan ugu baaqeynaa Dowladdu in ay si deg-deg ah u bilowdo biyo-dhaamis dadkana la samata-bixiyo.

### **DHAQAALAHA:**

Sicir-bararka iyo kororka maciishadda daruuriga ah ayaa si weyn kor ugu kacay, waxaa taas bar-barsocda in dakhliga dadka soo gelaayey uu hoos dhacay, taas oo soo jiidey saboolnimo, ba'an oo aan horey loo arag, ma jirto qorshe dowladdu soo bandhigtey ee la xiriira qiimaha qutul-daruuriga cirka isku shareeraya iyo dadka saboolka ah ee aan awoodin helidda cunno.

### **KU TAKRIFALKA HANTIDA:**

Iyada oo hoos-u-dhac dhaqaale dalka oo dhan ka jirto, oo dunidu isu diyaarineyso sidii looga gaashaaman lahaa cunno-yari, kadib dagaalada ka socda Yukreeyn, ayaa Dowladda Puntland si ba'an ugu takri fashey hantidii yarayd ee dadka, mudadii ay ku jirtey soo xulashada Xildhibaanada federaalka, taas oo haddii bulshada loo leexin lahaa, keeni lahayd in nolosha dadku kor u soo kici lahayd, ayna noqon lahayd mid la mahadiyo,

### **SIYAASADDA:**

Waxaan caad inakaba saarneyn xaaladda siyaasadeed ee Puntland, tan iyo markii uu xilka la wareegay Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni, waxaa dalka hareeyey khilaaf siyaasadeed, kaas oo u dhexeeyey isaga iyo Madaxweyne ku-xigeenkiisi la doortey Axmed Cilmi Cismaan, salkana ku hayey dastuurka iyo awoodaha uu midkastaa siinaayo, intaas kuma negaan khilaafku wuxuu galay golihii wakiilada Puntland, waxaana uu gaarey heer aad u xun oo la wada ogyahay sida ay ku dhamaatey ee ahayd: ***Kaan ila jirin waa iga jiraa.***

### **DAMACA MADAXWEYNAHA:**

Madaxweynaha Puntland Mudane Siciid Cabdullaahi Deni wuxuu diyaarado ku qaatey wasiiro, xildhibaan, agaasimayaal, saraakishii ciidanka, la-taliyaal iyo taageerayaal kale, maadaama uu yahay Musharax xilka Madaxweynaha Dowladda Federaalka. Markii Madaxweynuhu guuraayey shacabka lama hadlin, uma sheegin ujeedooyinkiisa iyo danaha Puntland uga xiran Muqdisho ee wufuuda intaas le'eg u kaxaystey, kama hadlin xaaladda ba'an ee abaarta iyo dhaqaale xumida dalka ka jirta.

Puntland waa dowlad ka horeysey Madaxweyne Siciid Deni, wuxuu yimid iyada oo jirsatey 20 sano, ma noqon karto Puntland wax qof lee yahay, halka uu doono la aado oo uu ku gaaro dano gaar ah.

Sida uu qabo dastuurka Puntland qodobkiisa 3aad farqadiisa 2aad.

***”Ma jiri karo qof, koox ama qayb kamid ah bulshada oo awoodda dowladnimo u adeegsan kara si gaar ah”***

Sidaas darteed waxaan ku baaqeynaa:

In loo hoggaansamo qawaaniinta iyo xeerarka u dejisan Dowladda Puntland, oo la kala saaro damaca iyo doonitaanka Madaxweynaha iyo fulinta shaqooyinka dowladda Puntland, sidaas darteed, maadaama Madaxweynihii u gudan Karin waajibkiisi shaqo si ku-meel-gaar ah, waa in Madaxweyne ku-xigeenka Puntland Axmed Cilmi Cismaan gutaa waajibaadkiisa si waafaqsan qodobka 81aad iyo farqadaha hoos yimaada..

Sidoo kale waxaan ku baaqeynaa in dhaqaalaha Puntland ee ka yimaada cashuurta dadweynaha laga qaado aan sinaba loogu isticmaali karin danno gaar ah.

Ugu danbeyntii si bulshadu u hesho dowladnimo dhamays-tiran oo ku dhisan nidaamka dimoqraadiyadda iyo tallo-wadaaga waa in degdeg loo dhaqaajiyaa barnaamijka ururada lana muddooyaa xiliga la qabanaayo goloyaasha deegaanada harsan.

**WABILAAHI TOWFIQ**